IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 20ka Feberaayo 1988 L. 1 R 2

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar walba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortilaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Caashuuraha ee

FAAFIN RASMI AH L. 1 R 2 ee 20 Feb. 1988.

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 4 ee 17 Jan. 1988, Dib. U Habayn Hu'ga Garscorid da (Toga) BOG. 108

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 5 ee 20 Jan. 1988, Sheekh Mukhtaar oo laga bed delay Maxkamadda B/da Gobolka Bay » 109

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L.6 ee 12 Jan. 1988, Magacaabid Mootaayo. » 110

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA,
L. 8 ee 20 Okt. 1987, Aqoonsi Urur Samafal » 111

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

DAWLADA HOOSE MUQ. 30.3.86, Naado Dhul
J/le Maxamed Geele Canshuur L. 81 » 112

DAWLADA HOOSE MUQ. 30.3.86, Naado Dhul
J/le Khadiija Jaamac Airax L. 82 » 113

DAWLADA HOOSE MUQ. 30.3.86, Naado Dhul
J/le Cabdi Cusmaan Nuur L. 83 » 114

DAWLADA HOOSE MUQ. 30.3.86, Naado Dhul
J/le Cabdi Nuur Cabdi L. 84 » 115

DAWLADA HOOSE MUQ. 13.1.86, Naado Dhul
J/le Cabdi Xaaji Axmed L. 85 » 116

DAWLADA HOOSE MUQ. 28.1.86, Naado Dhul
J/le Dh. Sheekh Ciise Maxamed L. 86 » 117

DAWLADDA HOOSE MUQ. 8.4.86, Naado Dhul
J/le Cusmaan Cumar Maxamed L. 87 » 118

DAWLADDA HOOSE MUQ. 3.4.86, Naado Dhul
J/le Saalax Karaama Maxamed L. 88 » 119

DAWLADDA HOOSE MUQ. 8.4.86, Naado Dhul
J/le Maxamuud Nuur Cali L. 89 » 120

DAWLADDA HOOSE MUQ. 7.4.86, Naado Dhul
J/le Xaajiya Maana Weliya L. 90 » 121

DAWLADDA HOOSE MUQ. 7.4.86, Naado Dhul
J/le Naado Cali Guure L. 91 » 122

DAWLADDA HOOSE MUQ. 7.4.86, Naado Dhul
J/le Khadiija Saalax Cabdalla L. 92 » 123

DAWLADA HOOSE MUQ. 28.7.86, Naado Dhul
J/le Abuukar Xaaji Abu Maxamed L. 93 » 124

DAWLADDA HOOSE MUQ. 29.9.86 Naado Dhul
J/le Maxamed Muuse Cabdi L. 94 » 125

DAWLADDA HOOSE MUQ. 16.3.86, Bed. Naado Dhul J/le Cali Xaaji Abatti L. 95 » 126

DAWLADDA HOOSE MUQ. 16.3.86, Bed. Naado Dhul J/le Cusmaan Maxamed Heerow L. 96 » 127

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 25.1.88, Lumid Jeeg War. L. 0932399 ku qoran Saleebaan Maxamed Xirsi L. 97 » 128

MAXKAMADA GOBOLKA TOGDHEER, 8.1.88, Lumid J/War. L. 058027 ku qoran Maryan Cismaan Maxamed L. 98 » 129

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED, 22.9.87, Lumid J/War. L. 736513 ku qoran Cismaan Xersi Odawaa L. 99 » 130

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER, 20.5.87, Lumid J/War. L. 0297236 ku qoran Cabdullaahi Daahir Qaalib L. 100 » 131

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 17.1.88 Lumid J/War. L. 0367746 ku qoran Cusmaan Maxamed Faarax L. 101 » 132

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 31.1.88, Lumid J/War. L. 628882 ku qoran C/casiis Maxamuud Faarax L. 102 » 134

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 12.1.88, Lumil Jeeg War. L. 744706 ku qoran Maxamuud Cali Cilmi L. 103 » 135

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 7.1.88, Lumid Jeeg War. L. 0558462 ku qoran Cabdullaahi Sheekh Axmed L. 104 » 136

## QEYBTA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 4 ee 17 Jan. 1988, Dib U Habeyn Hu'ga Garsooridda (Toga).

MARKUU ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobkiisa 82aad.
MARKUU ARKAY: Sharciga Nidaamka Garsoorka Lam. 34 soona baxay 22kii Okt. 1974.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 31 soona baxay 2dii Abril 1975, laguna dhaqan geliyey labada go'oo hadda loo isticmaalo hu'ga Garsooridda.

MARKUU GARAWSADAY: Dhibaatooyinka iyo culeyska lagala kulmay labada go' muddadii loo isticmaalayey Hu'ga Garsooridda.

MARKUU KU QANCAN: Talo soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

### Qodobka 1aad
### Hu'ga (Toga)

Waxaa Dib u habayn lagu sameeyey hu'ga Garsooridda, wuxuuna noqonayaa:

1. Khamiis Buluug ah, jooggiisuna gaarayo dhudhumada lugaha, gacmo dheere, horay ka furan, garbahana ku leh xaasow huruud ah oo bush ka lusho, isla markaasna qoorta labadeeda daraf ku leh xiddig cad oo shan gees ah, oo matalaysa Calanka J.D.S. iyo.

2. Koofiyad nooca Baraawe oo buluug ah.

### Qodobka 2aad

### DADKA XIRANAYA HU'GA GARSOORIDDA

1. Xirashada hu'ga garsooridda waxay waajib ku tahay:-
   b) Garsoorayaasha Dawladda.
   t) Xeer Ilaaliyeyaasha.
   j) Qareennada iyo.
   x) Kaaliyeyaasha Maxkamadaha.

2. Hu'gaas waxaa la xiranayaa markii garta la qaadayo, Maxkamadda Gudaheeda oo keliya, tan iyo inta dacwaddu Socoto.

3. Koofiyadda waxaa qaadanaya labka (Ragga) oo keliya.

Qodobka 3aad

KA REEBID.

Xirashada hu'ga garsooridda waa ka mamnuuc dad ka duwan kuwa ku xusan qodobka 2aad ee xeerkan, oo iyaguna xiran kara waqtiga sharcigu tilmaamay oo keliya.

Qodobka 4aad

Xeer Kani Wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 17 Gen. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 5 ee 20 Jan. 1988, Sheekh Mukhtaar oo laga beddelay Maxkamadda Badbaadada Gobolka Bay.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Bodobka 82aad ee Dastuurka J.D.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambarkiisu yahay 3 soona baxay 10kii Jannaayo 1970kii kuna saabsanaa dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Wixii Beddelaad ku dhacay.

MARKUU TIXGELIYEY. Talo soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka ee ku cad Warqadda Tirsigeedu yahay 85/MD1/ee 19.11.88.

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Garsoore Sheekh Mukhtaar Cali C/Rarmaan, waxaa laga Beddelay Maxkamadda Badbaadada Gobolka Bay oo uu Guddoomiye ka ahaa, waxaana dib loogu celiyey Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta oo uu ka Tirsanaa.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 20 Gen. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 6 ee 12 Jan. 1988, Magacaabid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobkisa 82aad;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 3 ee 15.2.61 & Lr. 1 ee 2.3.1962 ee ku wada saabsan Habeynta Hawlaha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 7 ee 2.2.86 ee ku saabsan Mihnadda Nootaayada;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Ayadoo la tixgelinayo Qodobka 2aad ee Sharci Lr. 7 ee soo baxay 2.2.1986 laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo Xeerkan Jaallaha magaciisa hoos ku qoran waxaa lagu magacaabayaa Nootaayo: DR. AXMED MAXAMUUD XIRSI.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12ka Jannaayo 1988

MADAXWEYNAHA JDS

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 3 ee 20 Okt. 1987 AQOONSI URUR SAMAFAL.

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ASAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ASAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA.

ASAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed Lr. 37 ee 2.6.83.

ASAGOO ARKAY: Codsiga iyo Xeerka lagu dhisay Ururka Samafalka (TAAGEER).

ASAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay Abuuristа Ururka Noocaasi ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qodobka 1aad

In si rasmi ah loo aqoonsaday Ururka la yiraahdo (Taageer) oo ah Urur Samafal, ujeeddadiisuna ay tahay Mashaariicda Horumarinta Miyiga, Tababarada Beelaha Miyiga xirfado lagu abuurayo Ilo dhaqaale, sameyn Cilmi baaris la xiriiro dhibaatooyinka horumarinta Reer Miyiga, Horumarinta Waxbarashada, Caafimaadka aasaasiga. Beeraha, Biyaha iyo Jidadka.

Qodobka 2aad

Ururku wuxuu saldhigiisu noqonayaa Muqdisho, wuxuuna Laamo ku yeelanayaa Gobollada iyo Degmooyinka Dalka

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WASIIRKA WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA
S/Guuto Axmed Suleymaan Cabdalla

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Geelle Canshuur uu u soo qortay arji una soo soo qortay Waaxda Dhulka Ra-ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 13.5.86 uu 80 uu ku soo weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. C/Casiis Qaabkiisu yahay Rettangolare Addi mihiisuna yihiin 20x30 kuna fadhiya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: 129

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 126

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi kraa muddo (30) sodon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 30 Mar. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE

Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 81

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Khadiija Jaamac Afrax uu u soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 19.2.86 uu ku soo weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20x30 kuna fadhiya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 2443

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 2437

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 2442-40

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi kraa muddo (30) sodon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 30 Mar. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE

Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 82

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabdi Cusmaan Nuur (Do meniko) uu u soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 10.10.79 uu ku soo weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. C/Casiis Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20x30 kuna fadhiya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 127

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi kraa muddo (30) sodon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 30 Mar. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE

Dr. Xasan Maxamed Sabriye

I. 83

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabdi Nuur Cabdi uu u soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 9.11.61 uu ku soo weydiis ay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. C/Casiis Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20x30 kuna fadhiya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 271

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 264

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi kraa muddo (30) sodon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 30 Mar. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 84

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabdi X. Axmed Liibaan uu u soo qortay arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 20.10.84 uu ku soo weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. B/Dheere Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 80x80 kuna fadhiya mq. 160.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Jid

Koonfur Waxaa ka xiga: Jid

Galbeed Waxaa ka xiga: Gurigiisi hore

B a r i Waxaa ka xga: God.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 13 Jan. 1986.—

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 85

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J le Dh. Sheekh Ciise Maxamed uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 15.7.85 uu ku soo weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho degmada Shingaani Qaabkiisu yahay Retangolar Addimihiisuna yihiin 9,20X6 kuna fadhiya mq. 55,20.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada 1da Luulyo

Koofur waxaa ka xiga: Gurigiisii hore

Galbeed waxaa ka xiga: Jid dhan 1,30 Mt.

B a r i waxaa ka xiga: Jid dhan 1,20 Mt.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 28.1.1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 86

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cusmaan Cumar Maxamed uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 18.1.1986 uu ku soo weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 40X20 kuna fadhiya mq. 800.-

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lambar 7891—9892

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i : waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 8 Apr. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 87

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Saalax Karaama Maxamed uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 15.3.1986 uu ku soo weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya mq. 400/=

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Dhul Lambar 273

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul Lambar 272

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 8 Apr 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 88

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamuud Nuux Cali uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 22.11.1986 uu ku soo weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya mq. 600.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Bandar Qaasim

Koofur waxaa ka xiga: Dhul Lambar 187

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lambar 179

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 181

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 jodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 8 Apr. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 89

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Xaajiya Maana Weliya Sheekh Nuur ay soo qoratay Arji una s ooqoratay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalinta taariikhdu ahayd 31.10.67 ay ku soo weydiisatay gabal Dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN Qaabkiisu yahay Retangolare Addiminiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya mq. 600.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 200

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 194

B a r i waxaa ka xiga: 196

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Lahaanshaha... Rasmiga ah.—

Muqdisho, 7 Apr. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 90

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Naado Cali Guure uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 15.2.80 uu ku soo weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisu yahay Re. tangolare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya mq 600
SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 195

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 199

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lamb. 201

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 7 Apr. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 91

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA M/DHULKA RASMIGA AH.

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Khadiija Saalax Cabdalla ay soo qoratay Arji una soo qoratay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 15.3.86 ay ku soo weydiisatay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisu yahay Re_tangolare Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya mq. 600

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Guri dad

Koofur waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Maxamed Cabdi

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 sodon maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 7 Apr. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 92

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Abuukar Xaaji Abu'Maxamed uu u soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 25.7.1964 uu ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada X. Jeb-Jeb Waddada Via Rooma Qaabkiisu yahay Elle Addimihiisuna yihiin (9X12) + (5X8) = kuna fadhiya mq. 148.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid

Koofur waxaa ka xiga: Guriga Salaad Dheere iyo Xaaji Muridi Waali.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid

B a r i waxaa ka xiga: Guriga Saydii Suufi

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 28 Jul. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE

(Dr Xasan Maxamed Sabriye)

L. 93

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamed Muuse Cabdi uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 23.9.1986 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimiihiisuna yihiin mt. 13,50X13,50= kuna fadhiya mq. 182,25/.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Guri dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo 30 soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 29 Sep. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE

(Dr Xasan Maxamed Sabriye)

L. 94

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

QAYBTA M/DHULKA RASMIGA

BEDDELAAD NAADO DHU

Ku: XAFIISKA FAAFINTA SHARCIYADA RASMIGA AH.
OG: WAAXDA FARSAMADA DHULKA.

Waxaan idin ogeysiinaynaa in J/le Calli Xaaji Abatti, oo soo codsaday Taariikhda markay ahayd 10.2.80 cad dhul ku yaal Deg. Madiina, loona oggolaaday, Qaabkiisu ahaa Ret tangoiare Addimihiisuna mt. 35x20 lana mid ahaa mq. 700/ dhulkii asaga ahaa waxaa loola wareegay dan guud awgeed.
Waxaa loogu beddelay cad dhul oo ku yaal Deg. C/csiis, Qaabkiisu Settangoiare Addimihiisuna yihiin mt. 40x30 ku_ na fadhiya mq. 1.200/ sidaas awgeed Naadadii Hore oo loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3/23/2754 ee 15 SmTT. 1980,

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 225

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 228.

Muqdisho, 16 Mar. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Dr. Xasan Maxamed Sebriye

L. 95

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

QAYBTA M/DHULKA RASMIGA

BEDDELAAD NAADO DHU

Ku: XAFIISKA FAAFINTA SHARCIYADA RASMIGA AH.
OG: WAAXDA FARSAMADA DHULKA.

Waxaa idid ogoysiineynaa in J/le Cusmaan Maxamed Heerow, oo soo codsaday Tr. markay ahayd 30.6.76 cad dhul ku yaal Deg. Hodon, loona oggolaaday, Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna 20x30 lana mid ah mq. 600/ Dhulkii asaga ahaa waxaa loola wareegay dan guud awgeed.

Waxaa loogu beddelay cad dhul oo ku yaal Deg. C/csiis, Qaabkiisu yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin mt. 20x30 kuna fadhiya mq. 600 sidaa awgeed Naadadii Hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3/23/146 Taariikhdeeduna ahayd 19 Feb. 1977.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 239

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 232

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 239.

Muqdisho, 16 Mar. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Dr. Xasan Maxamed Sebriye

L. 96

## MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

**MGH/6/88** **Hargeysa 25.1.88**

UJ: Degreeto cusboonaysiin J.W. lumay Lr. yahay 0932399 ee 9.1.88 Sh.So. 100.000/ laga sameeyey Laanta 3aad ee Hargeysa ku qornaa magaca Saleebaan **Maxamed** Xirsi.
Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ah codsiga ee uu soo qortay Axmed Yuusuf Coomay ee 20.1.88 ee uu k ucoosanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee ku taariikhaysan 18.1.88 ee uu Bangigu u kala diray laamihiisa iyo xisaabaha guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa Laanta 3aad ee uu Bangigu ku soo caddee yey in uu Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusani uu iska leeyahay Astaamaha Ujeedada sare ku wada xusan;

MARKUU ARKAY: In Lacagta Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan uu iska leeyahay ninka la yiraa Axmed Yuusuf Coomay;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

### WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo, loona cusboonaysiiyo, cusboonaysiintana gacanta laga saaro Axmed Yuusuf Coomay ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah.

### WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa in uu nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga irdihiisa, si ciddii haysata Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

Kaaliyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Axmed Wacays **Maxamed**)

L. 97

MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO

MGT/16/88 Tr. 8.1.88

UJEEDDO: Baafin Jeegga Wareega ee Lam. 0580276

(Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer)

MARKU UARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeegga ee Lumay ee uu soo qortay J.le Maryan Cismaan Maxamed Maxamuud;

MARKUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Burco ee Tr. tahay 5.1.88;

MARKUU ARKAY: In uu lumay Jeegga ee lam. 0580276 ee Sh.So. 50.000/=;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. ee Sharciga Lam. 2 ee 9.9.1965.

WUXUU XEERAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega ee Lambarkiisu yahay 0580276, ee laga sameeyey Laanta 2aad ee Xamar, kuna qoraa Daahir Maxamed Aadan.

WUXUU AMRAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaalyeed Laanta 2aad ee Xamar in ay siiso J.le Maryan Cismaan Maxamed Maxamuud, Lacagta dhan 50.000/= oo ah bedelkii Jeegga Wareega ee kor ku xusan, kadib markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 20 casho gudahood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan la keenin wax ishor taag ah.

(Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer)

(Dr. Abokor Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco
L. 81

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED HARGEYSA

UJ: Degreeto Cusboonaysiin J/War. ee Lumay Lambar Yahay 736513 ee 11.7.87 sh.so. 13.750/ ku qornaa Cusmaan Xirsi Odawaa laga sameeyay L/1aad ee Hargeysa.

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Axmed Cabdi Kaa-riye ee ku taariikhaysan 15.9.87 ee uu ku codsanaayo in loo Cusboonaysiiyo J/War. ee lumay ee kor ku xusan.

MARKUU ARKAY: Taarka Bankiga Ganacsiga iyo keydka Laanta 1aad ee Hargeysa ee ku taariikhaysan 7.9.87 ee uu Bankigu u kala diray laamihiisa iyo Xisaabaha Guud.

MARKUU ARKAY: Xaashida Bankiga Ganacsiga iyo keyd-ka ee Lambar yahay 000895 ee ku taariikhaysan 17.9.87 ee uu Bankigu ku soo cadeeyay in uu Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku xusani uu leeyahay astaamaha ujeedada Sare ku xusan.

MARKUU ARKAY: In uu Lacagta J/War. ee lumay uu iska leeyahay Ninka la yiraa Axmed Cabdi Kaariye.

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku xusan la kansal ga-reeyo, loona cusboonaysiiyo Ninka la yiraa Axmed Cabdi Kaa riye, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah

W A X A A

La farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa in uu Nuqulka go'aanka ku dhejiyo Bankiga iridi-hiisa, cididdii haysata Jeegaasi War. ee lumay ee kor ku xu-san ay cabasho uga soo qortaan hadnii ay doonaan.

Hargeysa, 22.9.87.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. W/GALBEED H.

Maxamuud Maxamed Ismaaciil

Kaaliyaha Maxkamadda G.W. Galbeed Hargeysa

Axmed Waceys Maxamed

L. 99

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER,

KU: Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Xamar.
UJ: Baafin J/War. ee Lambar yahay 0297236.

MARKUU ARKAY: Codsiga uu soo qortay Cabdullaahi Daahir Qaalib, ee ku codsanaayo in loo Faafiyo J/War. ee Lam. yahay 0297236 ee Tr. tahay 11.10.86 ee xanbaarsanaa Lacagta dhan 100.000 sh.so. ee Lumay.

MARKUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsga iyo keyd ka L/Burco, ee Tr. tahay 23.4.87.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 65, Lumid J/War. ee Lam. yahay 0297236, kuna qoran Cabdullaahi Daahir Qaalib, kana Lumay. Xanbaarsanaana Lacagta dhan sh.so. 100.000 Lagana sameeyay L/Burco, Tr. 11.10.87.

**WUXUU AMRAYAA**

In loo cusboonaysiiyo J/War. ee kor ku xusan J/le Cabdullaahi Daahir Qaalib, markii ay ka soo wareegato 20 casho gudahood laguna sharciyeeyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Burco 20.5.87.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO.

Dr. Abuukar Islaw Cumar

Kaaliyaha Maxkamadda Gob. Togdheer Burco,

Xuseen Xasan Sugule

L. 100

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le C/raxmaan Maxamuud Faarax.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lam. 0367746 kuna jirto lacag dhan sh.so. 40.000 kuna qoran magaca J/le Hodon Axmed Maxamuud sida ku cad warqadda Lam. 600 iyo keydka Soomaaliyeed L/Q/Xisaabaadka Guud.
HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee Tr. 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lam. 0367746

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/2aad Hargeysa ku jirto lacag dhan sh.so. 40.000 kuna qoran magaca J/le Hodon Axmed Maxamuud,

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/2aad Hargeysa in ay siiso J/le C/raxmaan Maxamuud Faarax lacagta caddeyntu tahay sh.so. 40.000 oo ah beddelkii J/War. Kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortg ah aan laga keenin.

Muqdisho, 17.1.88.

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 101

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qoray J9le C/casiis Maxamuud Faarax.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lam. 628882 kuna jirto lacag dhan sh.so. 20.000 kuna qoran magaca J/le Cabdicasiis sida ku cad warqadda Lam. 1192 iyo Keydka Soomaaliy d Laanta Qaybta Xisabaadka Guud
HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee Tr. 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lam. 628882.

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliy d L.Q.X. Guud kuna jirto lacag dhan sh.so. 20.000 kuna qoran magaca J/le C/casiis Maxamuud Faarax

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsga yo keydka Soomaalyeed L/Las Canod

in ay siiso J/le C/casiis Maxamuud Faarax lacagta caddeyntu tahay sh.so. 20.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 31.1.88.

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 102

MGH/2/88 Hargeysa, 12.1.88

MAXKAMADDA GOB. W/GALBEED HARGEYSA

UJ: Dgreeto Cusboonaysiin J/War. Lumay Lam. Yahay 744706 ee 4.10.87 sh.so. 20.000 kuna qoran Maxamuud Cali Cimi laga sameeyay Laanta Boorama.

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Axmed Xasan Nuur ee 9.1.88 ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo J/War. ee lumay ee kor ku xusan.

MARKUU ARKAY: Taarka Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa ee 31.12.87 ee uu Bankigu u kala diray Laamihiisa oo dhan iyo Xisaabaha Guud.

MARKUU ARKAY: Xaashida Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa ee Lam. yahay 001333 ee 8.1.88 ee uu Bankigu ku soo cadeeyey in uu J/War. ee lumay uu iska leeyahay Astaamaha Ujeedada Sare ku wada Xusan.

MARKUU ARKAY: In Lacagta J/War. ee lumay uu iska leeyaha Nnka la yiraahdo Axmed Xasan Nuur.

MARKUU ARKAY: Qod. 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu ya hay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaas War. ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo loona cusboonaysiiyo Ninka la yiraa Axmed Xasan Nuur, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama cid dii awood buuxda ka haysta muddo 15 maalmood gudahood ah, ka dib marka Faafinta lagu soo saaro.

W A X A A

U Farayaa Maamulaha Bankiga Ganacsiga iyo keydka Hargeysa in uu Nuqulka go'aanka ku dhejiyo Bankiga Iridihiisa si ciddii haysata J/War. ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. W/G/Hargeysa
Maxamuud Maxamed Ismaaciil

L. 103

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

MGT/9/88 Burco 7.1.88

UJEEDDO: Baafin Jeegga Wareega ee Lam. 0558462
Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeegga Wareega ee lumay ee uu soo qortay Cabdillaahi Sheekh Axmed;

MARKUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Burco ee 6.1.88;

HADDUU ARKAY: Inuu lumay Jeegga Wareega ee lam. 0558462 ee Sh.So. 40.000/;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. ee Sharci lam. 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega ee Lambarkiisu kor ku xusan yahay ee laga sameeyey L. Burco Tr. 3.12.87 ee Sh.So. 40.000/ kna lumay Cabdillaahi Sheekh Axmed.

WUXUU AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Burco in ay siiso J.le Cabdillaahi Sheekh Axmed Lacagta dhan Sh.So. 40.000/ oo ah bedelkii Jeegga Wareega ee kor ku xusan. Ka dib markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 20 casho gudahood laga billaabo maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. haddii aan intaas la keenin wax ishortaag ah.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco
(Jaamac Cabdillaahi Bile)